بسم الله الرّحمن الرّحيم .

تحذير من فتن تموج كالبحر قد ظهرت

كما أخبرها الرّسول ﷺ أنظر في الصحيحين

البخاري ومسلم .

Waxaasoon diyaariyay Muxammad Shaafi Sh yuusuf Sh, maame,

Allaha inawaafajiyo labadeenaba dariiqa toosan …aamiin

Digitaan la,isaga digayo fitno u mawjadaynaysa

sidii bada ookale, oo banaanka u soo baxdey.

Siduu kawaramay Rasuulkeenii (NNKH).

Waxaad ka eegi kartaa kitaabada

Saxiixul Bukhaari Iyo Saxiixul Muslim.

Waxaasoon diyaariyay Muxammad Shaafi Sh yuusuf Sh, maame,

199/1/2019–صفر الخير–1440

Gogoldhig:

Waxaanhalkan sikoobanugusoo bandhigidoonaadhanbaal ku saabsanMasiibo Diini ahoo wadanka faro ba'anku haysa,iyo marinhabaabinka aloosan bulshada iyo jiilka soo kacaya dhexdooda.

Maxaayeelay waxaa soobaxaysidaad idinkuba lasocotaan,kooxo khawaarij ahama calooshood ushaqeystayaala ah,kuna dhuumaaleysanaya diintaislaamka oo marba marka kasii danbeysa magac cusub la baxaya,

Dadkana dulmi ku laynaya oo gawracaya,dhiigooda iyo maalkoodana xalaashadey, kuna gaalnimo xukumaya bulshada islaamkaawixii markaaaan iyaga raacsaneynculimo(Mashaa'ikh) iyo Dadweyneba.

kuwaasoouu Nabigeenu(csw)inooga sii warameyineyiman doonaan aakhiru zabanka,oo uu si cad oondaahna saarneyn inoogu sii tilmaamey,sidaa darteedinagana ay waajib tahayinaynu uga digno bulshadeena (Caruur iyo Cirrooleba)aafada intaa le'eg,baaxadaana leh ee diiniga ah .

Inagoo marka horenawax ka taabandoona sida ay naseexadu qofkasta oo muslim ah mid yar iyo mid weynbawaajib ugu tahay,

Ilaahayna waxaynu ka baryeynaainuu wadada toosan ina waafajiyo,sharkoodana inagailaliyo…

Waxaana iga xusuusin ah in Aayad kasta oo Qur'aan ah macneheedaiyo faah faahinteeduba ay ku hoos qoranyin iyadoo ku turjuman afka soomaaliga,
Axaadiistanasidookale waxaanad ku arkidoontaalabada dhinac (macanaha xadiiska iyo faah faahinta) lambaroka turjumaya faah faahin dheeraad ah macanahaama warka is ku duuban .

بسم الله الرّحمن الرّحيم .

Waxaan ku bilaabayaa magaca ilaahay. Allihii Nimcada aduunyada wada siiyay Islaamka iyo gaaladaba, Nimcada aakhirona siiyay islaamka oo kaliya.

الحمدلله والصّلاة والسّلام على رسول الله وعلى آله وأصحابه المجاهدين لدين الله …

Waxay mahadi usugnaatay Ilaahay, naxariis iyo nabad galyona korkiisa hakyeelo Rasuulkeena suuban iyo ehelkiisii iyo asxaabtiisii ku shahiiday diinta ilaahay.

(باب في النصيحة) أنظر في كتاب الرياض الصالحين(ج1/144)

(Cutubka ku saabsan Nasiixada) waxaad ka eegtaa kitaabka Riyaadu saalixiinka ah, juzka koobaad, xaashida boqol iyo afar iyo afartan.

(1) قَالَ اللهتَعَالَى:{إِنَّمَا الْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ} الحجرات: 10 ،

wuxuu ilaahay yidhi:sarrayn oo dhanna isagaa iska lehe (kuwa ilaahay iyo nabigaba rumeeyay waa walaalo) Suurada Alxujuraat aayada tobanaad.

(2) وَقالَ تَعَالَى أيضاً: إخباراً عن نوحٍ ﷺ:{ أُبَلِّغُكُمْ رِسَالاتِ رَبِّي وَأَنْصَحُ لَكُمْ وَأَعْلَمُ مِنَ اللَّهِ مَا لا تَعْلَمُونَ } الأعراف: 62 ،

Wuxuu markale ilaahay yidhi; sarrayn oo dhanna isagaa iska lehe, isgookawarramayaNabi Nuux (cs) inuu ku yidhi ummaddiisii markii ay ilaahay ka gaaloobeenisagana beeniyeen; (waxaan idin soo gaadhsiiyay farriimihii uu rabbigay ii kiin soo faray, waxaanan idinku waaniyey markii aan idiin digayey
inuu ilaahay idinkuciqaabi doono gaalnimada aad ka gaalawdeen, Iyo beeninta aad ibeeniseen aniga, iyo diidista aad diidaysaan naseexadeyda, waxaanan ogahay inaanu ilaahay ciqaabtiisa ka baajineynin kuwa danbi falayaasha ah).Suurada Al acraaf aayadda laba iyo lixdanaad.

(3) وعن هود ﷺ:{ أُبَلِّغُكُمْ رِسَالاتِ رَبِّيوَأَنَا لَكُمْ نَاصِحٌ أَمِينٌ }الأعراف: 68.

Markalena isagoo ilaahay kawaramaya Nabi huud(cs) markii uu ummaddiisa lahadlayey wuxuu yidhi; (waxaan idin soo gaadhsiiyay farriimihii rabbigay uu ii kiin soo faray, anigoo idiinkadigayay inaad caabudaan ilaahayqayrkii, oo aad rumaysaan aniga iyo fariinta aan xagga ilaahay idiin ka keenayba, Iga qaata naseexada iyo waanada, waxaan ahay mid ilaahay uu ku aamineyfarriintiisii).Suurada Al acraaf aayadda siddeed iyo lixdanaad…

وأما الأحاديث:فنكتفى في هذين الحديثين الجليلين التالى...

Haddii xagga wararka Nabiga (csw) aynu jaleecno, waxa aynu ku soo gaabsan doonnaa labadanxadiis ee hoosta ku xusan.

الحديث الأول:

عَنْ تَمِيمٍ الدَّارِيِّ ﷺقال: أَنَّ النَّبِيَّ ✕ قَالَ « الدِّينُ النَّصِيحَةُ(1) » قُلْنَا لِمَنْ ؟ قَالَ « للَّه(2) وَلِكتَابه(3) وَلِرَسُوله(4) وَلأَئِمَّة الْمُسْلمينَ وَعَامَّتهمْ (5)»...

التقرير:

قال النووي ﷺفي شرح صحيح مسلم 248/1 – 250 (55) : (1) النصيحة لله تعالى : معناها منصرف إلى الإيمان به ، ونفي الشريك عنه وترك الإلحاد في صفاته ووصفه بصفات الكمال .

(2) وأما النصيحة لكتابه سبحانه : فالإيمان بأنه كلام الله تعالى .. ، (3) وأما النصيحة لرسوله ✕: فتصديقه على الرسالة والإيمان بجميعما جاء به ,وبطاعته في أمره ونهيه , وبنصرته حيا وميتا بنصرة دينه .

(4) وأما النصيحة لأئمة المسلمين : فمعاونتهم على الحق وطاعتهم فيه .. (5) وأما نصيحة عامة المسلمين : فإرشادهم لمصالحهم في آخرتهم ودنياهم .. والنصيحة لازمة على قدر الطاقة)) ...

Xadiiska koobaad:

Waxaa laga wariyay saxaabiga layidhaa (Tamiim Addaariyi) (rc) inuu yidhi; Nabigu(csw) wuxuu yidhi; (diintu waa naseexo) (waano).waxaanu nidhi yay u tahay? Wuxuu yidhi; waxay utahay(1) (Ilaahay,) (2) (Iyo kitaabkiisa,) (3) (Iyo rasuulkiisa,) (4)

(Iyo kuwa hogaamiya diinta iyo dadka,) (5) (Iyo ummadda dhammaantoodba,)…

Faah faahin:

Wuxuu ku yidhi Imaamu nawawi sharaxa kitaabka Saxiixul muslim (j1/248-250)(55)isagoo faah faahinaya xadiiska macnihiisa;

(1)waxay diintu ilaahay naseexo ugu tahay; in lagu rumeeyo, iyo in cidkaleaan waxba lala wadaajinin ama aan lagala mid dhigin, iyo fogaansho laga fogaado in labaadhbaadho tilmaamihiisa oo lagu asteeyo tilmaam ka turjumaysa muuqaal dhamaystiran.

(2)Kitaabkiisana, xumaan ka hufnaaye,waxay naseexo ugu tahay; rummayn la rummeeyo in uu yahay hadalkii ilaahay sarrayn oo dhan isagaa iska lehe.

(3)Rasuulkiisana(scw) waxay naseexo ugu tahay;in lagu rummeeyofarriinta uu ilaahay u igmaday in uu gaadhsiiyo umadiisa iyo in la- aamino wixii uu layimid oo dhan, iyo in laqaato oo la raaco hadalkiisa markuu yidhaahdo waxaa sameeya ama daaya, iyo in loogu hiiliyo nolol iyo geeriba hiilka diintiisa.

(4)Kuwa hogaamiya diinta, dalka iyo dadkana,waxay naseexo ugu tahay; ina lagu kaalmeeyo sida toosan(Xaqqa) oo lagu raaco.

(5)Dhammaan ummaddanawaxay naseexo ugu tahay; in lagu hago danahooda Aakhiro iyo Aduunyadaba, Naseexaduna waa mid qof walba waajib ku ah intuu awoodi karo…

الحديث الثانى:

ومثله من حديث ابى هريرة …

Xadiiska labaad:

Warkii hore ee saxaabiga (Tamiim Addaariyi) layidhaahdo uu nabiga(csw) ka wariyay, mid lamida waxaa isna ka wariyay nabiga(csw) saxaabiga layidhaahdo magiciisa(Abu hureyrah) (rc) …

بحث عن الأرقام الحديثين السابق في الكتب التالى:

(1) أخرجه الإمام الحافظ مسلم في صحيحه (ج 1/ ص 53 رقم 205)، والإمامالحافظ أحمد في مسنده (ج 28/ص148رقم 16947) والحافظ أبوداود في سننه(286/4 ، رقم 4944) ، والحافظ النسائى في السنن

الكبرى (ج 5/ ص 229 رقم 8753) وفي الصغرى (156/7 ، رقم 4197)،والحافظ ابن خزيمة فى السياسة كما فى إتحاف المهرة للحافظ(8/3 ، رقم 2456) والحافظ ابن حبان في صحيحه (435/10 ، رقم 4574) ، والحافظ البغوى فى الجعديات (392/1 ، رقم 2681) ، والحافظ أبو نعيم فى المعرفة (449/1 ، رقم 1291)،والحافظ البيهقفى شعب الإيمان (323/4 ، رقم 5265) ...

(2) أخرجه الإمام أحمد في مسنده (ج 13/ ص 335رقم 7954) , والحافظ الترمذي في سننه(ج 4/ص 324) والحافظ النسائي في السنن الكبرى (ج 5/ص 229) ...

Tixraac.

Labadan Xadiis ee aynu soo xusnay waxaa soo saaray dhammaan xufaaddii waawaynayd amaba ragga warka Nabiga(csw) ku caan baxay ee dushsha ka qabtay, iyadoo mid walba hortiisa ay kuugu qoran tahay magiciisa, magaca kitaabka, lambarka juzka, xaashida iyo weliba lambarka xadiiska, ee ka bogosha wacan…

Dhammaan saddexda aayadood iyo labada xadiisee aynu kor kusoo xusnay waxa'aynu ku soo aragney,in qofkasta oo islaam ah ama culimo ah, uu waajib culusika saran yahay inuu uga naseexeeyo bulshadiisa ama dadka islaamka ahwax kasta oo cawaaqib xumo ku keenayaama ka fasahaadinaya,diintooda, caqiidadooda, iyo weliba dadnimadooda (sharafkooda).

فبعد كل ماسبق إليك من القرآن والحديث:ننقل لك التحذير الذي حذر لنا رسول الله ✕ في شأن الخوارج.

HadabaAayadahaa Qur'aanka ah iyo Axaadiistaa aad akhrisateykadib waxa aanu kuu soo rarridoonnaa (minguuriney),wixii uu Rasuulku(csw)inooga sii digey ee uu kaga waramey arimaha Khawaarijta.Inagoo gudagalidoonahorena ugusii socon doona nuxurka uu xambaarsanyahay dhambaalkenu.

وهؤلاء الخوارج يبنون مساجدا كثيرة على طريق مسجد الضرار ألذي قال الله تعالى في محكم تنزيله :

{ وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا مَسْجِدًا ضِرَارًا وَكُفْرًا وَتَفْرِيقًا بَيْنَ الْمُؤْمِنِينَ وَإِرْصَادًا لِمَنْ حَارَبَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ مِنْ قَبْلُ وَلَيَحْلِفُنَّ إِنْ أَرَدْنَاإِلا الْحُسْنَى وَاللَّهُ يَشْهَدُ إِنَّهُمْ لَكَاذِبُونَ (107) لا تَقُمْ فِيهِ أَبَدًا لَمَسْجِدٌ أُسِّسَ عَلَى التَّقْوَى مِنْ أَوَّلِ يَوْمٍ أَحَقُّ أَنْ تَقُومَ فِيهِ فِيهِ رِجَالٌ يُحِبُّونَأَنْ يَتَطَهَّرُوا وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُطَّهِّرِينَ (108) أَفَمَنْ أَسَّسَ بُنْيَانَهُ عَلَى تَقْوَى مِنَ اللَّهِ وَرِضْوَانٍ خَيْرٌ أَمْ مَنْ أَسَّسَ بُنْيَانَهُ عَلَى شَفَا جُرُفٍ هَارٍ فَانْهَارَ بِهِ فِي نَارِ جَهَنَّمَ وَاللَّهُ لا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ (109) لا يَزَالُ بُنْيَانُهُمُ الَّذِي بَنَوْا رِيبَةً فِي قُلُوبِهِمْإِلا أَنْ تَقَطَّعَ قُلُوبُهُمْ وَاللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ (110) } .صدق الله العظيم ...

Haddba kuwaa khawaarijta ah ee aynu isaga naseexayneyno waxa ay dhissaan masaajido farabadan, kuwaasoo leh raadkii uu lahaa masaajidkii dhibaatada, oo ah kii uu inoogaga waramay ilaahay sarrayn oo dhana isaga ayaa iska lehe, Qur - aankiisa kariimka ah…

Macnaha Aayadda:

(Kuwii dhissay massaajidkadhibaatada(مَسْجِدالضرَار)waxay udhisseen(ضِرَارًا) in ay ku dhibaataynayaan ama kula dagaalamaan masjidkii rasuulka(csw)ee(quba'a)iyo mu'miniinta

ku tukanaysa. Iyo(وَكُفْرًا)gaalnimo ay ka gaaloobeen ilaahay iyo rasuulkiisa.Iyo(وَتَفْرِيقًا)kala qayb qaybinay ku kala fogaynayaan mu'miniinta, si ay khilaaf ugu abuuraan dhexdooda.Iyo(وَإِرْصَادًا)dhuumaalaysi uu ku dhuumaalaysanayomid ilaahay iyo rasuulkiisaba la dagaalamay hadda kahor)."waxaanu ahaagaalkii la'odhan jiray magaciisa(Abuu Caamir Arraahib)" oo uu Rasuulkuna (csw) ku magacaabey (abuu caamir al faasiq)
(Waxay kuugu dhaaranayaan inaanaan ilaahay dartii iyo wanaag waxaan ahayn uga jeedin, ilaahyna waa ka markhaati inay beenaalayaalyihiin.)(107)
(Ha ku tukan waligaa,waxa ka xaqleh oo mudan inaad ku tukato masjid lagu dhissaycabsida'a ilaahay aasaas kiisii hore maalintii labilaabay, oo ay ku jiraan gudihiisa rag jecel in ay is daahiriyaan, ilaahayna wuxuu raali kayahay kuwa is daahiriya.)(108)(Mawaxaa xaq leh oo mudan mid dhiskiisii horelagu seesay cabsida'a ilaahay iyo raali noqoshadiisa ayaa khayr leh? misse tusaale ahaan mid laga dul dhissay bohol naar ah qarkeeda, dabadeed kuladuntay issaga iyo wixii ku jirayba naaru jahannama? ilaahayna ma toosiyo kuwa dulmi falayaasha ah.)(109)(ka bixi maayo dhisitaankooda kuwii dhissayey, shakki qalbigooda, ilaa uu ka googa'o qalbigoodu, ilaahayna wuu ogyahaywax walbawaana mid xukunkiisu uu toosan yahay.)(110)…

Faahfaahin:

Waxay kusoo degtay aaydani, labaiyo toban nin oomunaafaqiin ah oo dhissay masjidkii ilaahay uu ku magacaabay(مَسْجِدالضِرَار)masjidka dhibaatada, waxaana abaanduule u ahaagaalkii la'odhan jirey (Abuu Caamir Al faasiq)oo hada kahorRasuulka(csw) dagaal kula jirey,kadibnawuxuuna markaahub iyo hiilba ka doontay boqor - tooyadii qaysar ee (Ruum) si uu markale ugula dagaalamo Rasuulka (csw)waxaanu ku sii amreykooxdiisii munaafaqiinta ahayd oo iyagu markaa asxaabta ku dhexjireyiney sii dhissaan masjidka dhibaatada,si uu

uga faa'iideysto ama uga dhex abuuro asxaabta khilaaf iyo kala qaybsanaan,
oo ay mu'miniinta ku kala firdhiyaan, iyagoo xilligaa mu'miniintu ku wada tukan jiray masaajidkii Rasuulka(scw) ee Masjidu Quba'a,
markaa si ay taasi meesha uga baxdo oo uu badhbameel ku tukadoayaa waxa ay dhisseen (masjidka dhibaatada) markii ay dhameeyeen dhismihiisiiayey u yimaadeen Rasuulka(csw) isagoo u diyaar garoobey inuu u baxo dagaalkii(Tabuuk)markaasey ku yidhaahdeenwaxaanu dhisney masaajid ay keentey dhiskiisa baahi looqabo aawadeed,
taasoo ahsi ay ugu tukadaan,tukado, ninkiixanuusadaiyokii muraad yeesha,ama habeenadaroobabku da'ayaan ee qabawga ah,waxaanan jecelnahay inaad timaado oo ku tukato noogunaduceysidinuu barakoobo.
Markaasuu Rasuulku(csw) ku yidhi: imikadagaal ayaan ubaxayaa ee hadii aan ka soo noqdo waan idiin iman doonaa markaasaanku tukan doonaa.
Kadib markii uu soo noqdeyayaa Ilaahay(sw) kusoo dajiyey Rasuulka(csw) aayadan dabadeeto wuxuu amrey Rasuulku(csw)in ladumiyooo meeshii uu ka dhisnaana laga dhigo kuddaafad xashiishka lagu daadiyo.

Sidaasoo kale ayey iyagunakhawaarijta maanta joogatamagac kastabahalabexeeneudhissaan masaajiddo lamidah masjidkiidhibaatada,oo ay massaajid dhissan midkale uga dul dhissaan,si ay mujtamaca isalaamka ah dhexdiisa ugu abuuraan khilaaf iyo kala qaybqaybin, dhallinyaradana uga lummiyaanwadada toosan .

أنظر واقرأ الأحاديث التالى,ألتي وردت في الكتاب التاج الجامع للأصولفي أحاديث الرسول ✕ .

Waxaad ka eegtaa kana akhriydaa axaadiistanoo ay ku soo aroortey,
kitaabkamacnaha magiciisu uu yahay
(Taajkii kulminayeyXaqiiqada wararka Rasuulka(csw)).

الباب الثالث في الخوارج والمارقة من الدّين .(1)

1- عن ابي سعيد ﷺ قال: بعث علي بن ابي طالب ﷺإلى رسول الله ✕ من اليمن بذهبةلم تحصّل من ترابها في أديم مقروظ (2) فقسمها بين أربعة نفر, بين عيينة بن بدر والأقرعبن الحابس وزيد الخيل وعلقمة بن علاثة,فقال رجل من أصحابه:كنا نحن أحقّ بهذامن هؤلاء (3) فبلغ النبيّ ✕ فقال:ألا تأمنوني وأنا أمين من في السَّماء يأتينى خبرالسَّماء صباحا ومساءً, فقام رجل غائر العينين(4) مشرف الوجنتين ناشز الجبهة(5) كثّ اللّحية محلوق الرّأس مشمَّر الإزار (6) فقال: يا رسول الله إتق الله , فقال: ويلك أولست أحقّ أهل الأرض أن يتقى الله. قال:ثمّ ولى الرّجل, فقال خالد بن وليد:يا رسول اللهألا أرضرب عنقه فقال: لا، لعلّهأن يكون يصلّى قال خالد: وكم من مصلّى يقول بلسانه ما ليس في قلبه , فقال رسول الله ✕: إنيلم أومرأن أنقب عن قلوب الناسولا أشقّ بطونهم ثمّ نظر إليه وهو م//قف (7) فقال:إنّه يخرجمن ضئضئهذا(8)

2- قوم يتلون كتاب الله رطباً (9)لايجاوز حناجرهم يمرقونمن الدّين كما يمرق السّهممن الرّميّة (10)قال أظنه قال:لئن أدركتهم لأقتلنّهم قتل ثمود .

تقرير:

(الباب الثالث في الخوارج والمارقة من الدّين) (1)

(1) أي في ذكرهم وبيان صفاتهم وحكمهم , فهم قوم يظهر عليهم التمسك بالذين ولكنهم ليسوا على شيئ منه يبغضون المؤمنين ويودون الكافرين . (2) بقطعة ذهب لم تصف من ترابها موضوعة في جلد مدبوغ بالقرظ, وكانوا حينئذ بالجمرانة بعد انصرافهم من حنين . (3) ذالك الرجل قريب عهد بالإسلام وضعيف الإيمان . (4) عيناه داخلتان في محاجرهما . (5) مرتفع الوجنتين وعالى الجبهة . (6) غزير شعر اللحية وحالق رأسه بخلاف العرب حينئذاك فإنهم كانوا يبقون شعورهم ويفرقونها . (7) ثم ينظر النبي ✕ إلى هذا الرجل وهو مول قفاه ذاهبا .(8) من أصله وجنسه . (9) يكثرون من تلاوته فلا تزال ألسنتهم رطبة به . (10) لا يجاوز حناجرهم: لا يصل إلى تراقيهم وأولى إلى قلوبهم ...

(1)Cutubka Saddexad Ee ka waramaya Khawaarijta

Iyo

kuwa ka dhexbaxay Diinta.

(1)Waxaa laga wariyay saxaabiga magiciisa layidhaa (Abaa Saciid)(rc) inuu yidhi; Sayid cali binu Abiidaalib(rc)ayaa wuxuu u soo diray Rasuulka(csw) isagoo jooga yamman, dahab aan laga sifaynin ciiddii oo ku jira harag lamagdiyay(2),markaasuu Rasuulku uqaybiyayafar qof oo kala ahaa(Cuyaynata binu badar)(Aqracbinul xaabis)(Zaydul khayl)iyo (Calqamata binu culaathata).Dabdeeto nin asxaabtiisii kamida ayaawuxuu yidhi; Annagaa ka mudnayn in lasiiyo dahabka kuwaa (3).

Hadalkii ayaa Nabiga(csw) gaadhay markaasuu yidhi; miyaad I aamini waydeen waxaaba I aaminey allihiisamada iiga keenayey warka samada galin hore iyo galin dambeba.

Waxaa kacay markaa nin indhihiisu ay gudhanyihiin (4), oo koodad buurbuuran wajiguna soo baxsanyahay(5),gadhkiisu cuuran yahay, madaxa xiiran, macawistana xaytay(6),wuxuu yidhi; rasuulkii ilaahayaw ilaahay ka cabso! Markaasuu ugu jawaabay Rasuulku(csw) war halaagsantaye miyaanan ahayn ka ugu xaqleh inuu ilaahay ka baqowaxa dhulka kunool.

Wuxuu yidhi saxaabigii xadiiska warinayey; Ninkii baa dhabarka jeediyey, dabadeeto khaalid binu waliid baa wuxuu yidhi; Rasuulkii ilaahayaw ii fasax aan luqunta ka gooyee, markaasuu yidhi Rasuulku(csw); maya, waxaaba laga yaabaa inuu tukado'e.

Dabdeeto khaalidayaa yidhi; imisaa mid tukanaya afkana ka'odhanaya waxaan qalibigiisa ku jirin.

Markaasuu Rasuulku(csw) ku yidhi; aniga layma amrin inaan baadh baadho dadka qalbigooda iyo inaan jeexo calooshooda midna, deedna wuxuu eegey Nabigu(csw) xaggii ninka, isagoo qadaadka soo jeediyey(7), markaasuu yidhi;waxaa kasoo bixidoona kaa cidhibtiisadanbe(8),

koox quraanka akhriyeysa oo uu carabkooda ka qoyanyahey (9), haddana dhuunta aanu u dhaafsiisneyn,diinta ayey ka baxeen sida uu leebkuqaansada uga baxooo kale (10).Wuxu yidhi waxaan umalanayaainuu yidhi;haddaan soo gaadho waxaan ulleynlahaa sidii qoomkii reer thamuud oo kale.

---

(1)Cutubka Saddexad Ee ka waramaya Khawaarijta

Iyo

kuwa ka dhex baxay Diinta.

(1) Waxaa looga jeedaa;in lagaga waramayocutubkan khawaarijtuwaxa ay yihiin,iyocaddeyn lagu faahfaahinayo tilmaamahooda iyo abaal marintoodaba, waa kuwo muujinaya iney iyagu yihiin kuwa kaliya ee haysta kuna dhaqmaya diintalaakiin innabaaan diinta kaga sugneyn hadana, mu'u miniinta ayey ucadhoonayaan amaba u dudayaan gaaladana wey isku dhadhajinayaan oo rixinayaan. (2)Waxaa looga jeedaa; in dahab ah oo aan weli laga dhalaalinin ciidiilaguna dhexridey harag la(magdiyey),"tusaale ahaan;waa(sibraarka) oo kale ama harag loogu talagaley in loo is ticmaalo sida weelka ama agabyada kale ee alaabta lagu gurto"

Xilligaana waxay ahayd markiii laga soo noqdeydagaalkii (xuneyn) kadib,

(3)Ninkaasina wuxuu kamid ahaa dadkii xiligaa soo islaamey iimaankiisuna weli uu diciif yahay.
(4)Ninkan kale ee Nabiga(csw) deeqda uu bixiyey kula murmayeyna waamid tilmaamo isaga uggaara lahaa oo uu Rasauulku(csw) ku tilmaamey, waxaana kamid ahaa indho gudhan oo godka ay ku sameysan yihiin dhexdiisakasoo jeeda,(5) Labadiisa koodna ay kor usoo taagan yihiin,Wajiga halkaa salaanta loo yaqaano ee inadhaha ka sarraysana,sare uga soo baxsantahey wajiga intiisa kale, (6)Gadhkiisuna yhay mid aad u weyn oo fara badan, Maduxunaxiiran oo dhukurtey isagoo khilaafsanaa dhaqankii carabtu lahayd xilligaa oo intey bixiyaan timaha ayey dhexdana ka kala qaybin jireen,
ninkaasi macawista ama surwaalka ama marada uu xidhnaa wey u xaydneyd ama u faydneyd.
(7)marakaa kadib ayuu Nabigu(csw) ninkaa xaggiisa eegay isagoo qadaadka jeediyey oo sii socda, (8)Debadeeto wuxuu yidhi; ninkaa cidhibtiisa ama faraciisa iyo jinsigiisabawaxaa kasoo bixidoona, (9)kuwo aad u badinaya qur'aanka akhrintiisa, kana tagi maayaan inuu mar walba ka qoyan yahay carabkooda quraanku, ujeedaduna waxa weeye mar qudha arkimeysaan iyagoo afka ka qaadaya, (10) hadana u dhaafimaayo cunahooda, ooma gaadhayo ilaa hungurigoodaama margiyadoodawaliba ilaa qabigooga …

3– وعنه قال: بعث علي وهو باليمن بذهبة في تربتها إلى رسول الله ✕ فقسمها بين أربعة" عيينة والأقرع وزيد الخيل وعلقمة فغضبت قريش فقالوا: أيعطى صناديد نجد ويدعنا (1) فقال رسول الله ✕: إنى إنّما فعلت ذالك لأتالّفهم فجاء رجل كثّ اللّحية مشرف الوجنتين غائر العينين ناتئ الجبين محلوق الرّأس فقال: إتّق الله يا محمد .فقال رسول الله ✕: فمن يطع اللهإن عصيته أيامننعلى أهل الأرض ولا تأمنونى ثم أدبر الرّجل فاستأذن أحد القوم في قتله قال رسول الله ✕: إنّمن ضئضئ هذا قوما يقرءون القرآن لايجاوز حناجرهم, يقتلون أهل الإسلام ويدعون أهل الأوثان(2) يمرقون من الإسلام

كما يمرق السّهم من الرّميّة لئن أدركتهم لأقتلنهم قتل عاد. رواهما الشيخان والترمذي (3) .

تقرير:

(1) الصناديد جمع صنديد. وهو السيد في قومه . (2) فهؤلاء يودون الكفار ويبغضون أهل الإسلام . (3) مرويات البخاري هنا في بعث خالد وفي باب من ترك قتال الخوارج للتألف وفي فضل القرآن. ومرويات مسلم في الزّكات واللفظ في الكل له ...

Macnaha Xadiiska:

(2)Waxaa markale laga wariyay saxaabiga magiciisa layidhaa (Abaa saciid)(rc) inuu yidhi: Sayid cali binu Abii daalib(rc) ayaa wuxuu u soo diray Rasuulka(csw) isagoo jooga yamman, dahab aan weli laga saarin ciiddii,markaasuu wuxuu uqaybiyay afar nin oo kala ah (Cuyaynata) iyo(Aqrac) iyo (Zaydul khayl) iyo (Calqamata). Deedna waxaa ka cadhootey qureysh, oo waxay yidhaahdeen;(1) madaxda reer najdiwuu siinayaa annagana nama siinayo.

Markaasuu Rasuuku(csw) yidhi:waxa kale maahee waxaan sidan uyeeley si aanqalbigooga usoo jiido.

Waxaa markaa yimid,Nin gadhkiisu uuweyn yahay, ookoodad buurbuuran, indhihiisu gudhan yihiin, wajiguna soo taagan yahay,madaxa xiiran, deedna wuxuu yidhi; Muxamedaw ilaahay ka cabso!

Markaasuu yidhi Rasuuku(csw): yaa ilaahay ka cabsanaya haddaan anigu ka baqan waayo ama aan caasiyo, waxa dhulka jooga oo dhan ayuu igu aaminey ilaahay idunkuna ima aamineysaan miyaa?.

Markaasuu ninkii dabada jeediyey, kadibna mid asxaabta ka mida ayaa Rasuulka(csw)wuxuu ka codsadey in uu dilo ninkan, deedna wuxuu yidhi Rasuulku(csw); waxaa kasoo bixidoona kaa cidhibtiisa danbe, koox qur'aanka akhriyeysa haddana kalxamaha

aanu u dhaafsiisneyn, (2)islaamka ayey leynayaankuwaasnaamta caabudana wey deynayaan,islaamka ayey ka baxeen sida uu leebkuqaansada uga baxo oo kale,
haddaan haleeli lahaa ama aan gaadhi lahaa waxaan ulleyn lahaa sidii reer caad oo kale.
(3)waxaa weriyey labadaa xadiis ee aynu soo xusnay, Bukhaari iyo Muslim, iyo Tarmaddi …

Faah faahin:

(1)Waxaa loola jeedaa Duqqeydii ama Cuqaashiiqabaa'ilka (NAJDI).
(2)Waxaa looga jeedaa Niman kaasimu'uminiinta ayey la colaatamayaanoo ay leynayaan,gaaladanalaynmaayaan ee wey deynayaan.
(3)Bogaga uu bukhaari ku weriyey xadiiskan waxa weeyifaqradda (Diritaankii khaalid, Iyo Cutubkakawaramayaciddii ka tagta leynta ama dilka khawaarijta isagoo iyaga kusoo jiidanaya, waxaa kele oo uu kaga waramay cutubka uu kaga hadlayo fadliga quraanka).
(Muslimna wuxuu kaga waramay cutubka uu kaga hadlayo Zakada, sida uu xadiisku u qoranyahayna dhammaan isaga ayaa u qorey)…

4- وعنه قال:بينما نحن مع النبيّ ✕ وهو يقسم قسما (1) أتاه ذو الخويصرة وهو رجلمن بني تميم فقال: يا رسول الله أعدل فقال رسول الله ✕: ويلك ومن يعدل إن لم أعدل قد خبت وخسرت إن لم أعدل، فقال عمر بن الخطاب يا رسول الله ائذن لي فيه أضرب عنقه، قال: دعه فإنّ له أصحابا يحقر أحدكم صلاته مع صلاتهم وصيامه مع صيامهم, يقرأون القرآن لايجاوزتراقيهم يمرقون من الإسلام كما يمرق السّهممن الرّميّة

ينظر إلى نصلهفلا يوجد فيه شيء (2) ثم ينظرإلى رصافهفلا يوجد فيه شيء(3) ثم ينظر إلى نضيِّهفلا يوجد فيه شيء (4) ثم ينظر إلى قذذه فلا يوجد فيه شيء (5) سبق الفرث والدّم (6) آيتهم رجل أسود إحدى عضديه مثل ثدى المرأة أومثل البضعة تدردر(7)يخرجون على حين فرقة من الناس, قال أبو سعيد: فأشهد أني سمعت هذا من النبيّ ﷺ وأشهدأنّ عليّا قاتلهموأنا معه فأمر بهذا الرّجل فالتمس فأُتيَ به (8) فنظرت إليه على نعت رسول الله ﷺ ألذي نعت (9). رواه الشيخان والترمذي...

---

(1) بعد منصرفهم من حنين . (2) النصل حديد السهم . (3) الرصاف: مدخل النصل من السهم.(4) النضى كغنى:القدح الذى يرمى به عن القوس .(5) القذذ: جمع قذة: وهي ريش السهم.(6) سبق أى جاوز السهم الفرث والدم من الصيد, والمراد أن هؤلاء بعيدون عن الإسلام كما جاوز السهم مرماه فليس في شيء منه علامة إصابة . (7) فعلامة هؤلاء أن فيهم رجلا أسود إحدى عضديه كثدى المرأة أو قال مثل البضعة أى قطعة اللحم ألتى تتدردرأى تتحرك وتضطرب.(8) أى وهو قتيل . (9) فصدق قول رسول الله ﷺ فيهم وظهرت معجزته كالشمس في رابعة النهار .

Macnaha Xadiiska:

(3)Waxaa markale laga wariyay saxaabiga magiciisa layidhaa (Abaa sacii)(rc) inuu yidhi:Annagolajoogna Nabiga (csw) isagoo wax qaybinaya(1), ayaa waxaa u yimid ninka layidhaado (Dul khuweysarata) waxaanu ahaa nin reer tamiim ah,markaasuu ku yidhi;Rasuulkii ilaahayawCadaalad same(wax u qaybi)."Afxumadiisa isagooiska dhigaya mid ka cadaalad fiican Nabiga(csw)"hunguri badnaanaawadeed .

Dabadeeto wuxuu ku yidhi Rasuulku(csw);war halaagsantayekumaa xaqsoorayahadaanan anigu xaqsoorin ama cadaalad wax u qaybinin,waad hoogteyoo waad khasaartey.Deedna Cumar binu khidaab(rc) ayaa Rasuulka (csw) ka codsadey inuu luqunta ka gooyo munaafaqanNabiga(csw)sidaa ula hadley,

markaasuu Nabigu(csw)ku yidhi; iska daa ninkani wuxuu leeyahey koox,uu xaqiri doono ama yareysan doono ninka

idinkamidka ahi salaadiisa, markuu arko iyagu sidey u tukanayaan salaadooda, soonkiisuna uu layaraan doono markuu arko soonkooda sida wanaagsan ee ay ussoomayaan,Qur'aanka ayey akhriyayaan, dhuuntoodana uma dhaafsiisna.islaamka waxay ugabaxeen sida leebku marka lagu rido ugaadha uu uga dhex baxo ugaadha lagu ridey oo kale,deedna hadii diblaga eego leebkabirtiisii waxba laga heli maayo(2), hadana qammadkiisa hadii la'eegowaxba laga heli maayo(3),hadana birta iyo qammadku barta ay iska galaan hadii la'eego wax raad ah laga heli maayo(4), hadana baalashiisa hadii la'eego iyana sidookale waxba laga heli maayo(5), uuskii iyo dhiigiiba wuu ka dheereeyey(6), nimankaa calaamdooduna waxa weeyi;Nin madow ayaa ku jira, labadiisa dhudhun mid kamid ahna waxay leedahay cad siidii naaska haweenka oo kale ah, ama xubin hilib ha oo lulmanaysa(7),

waxaanay soo bixidoonaanxilli uu mujtamucuama dadku uu isku dhacsanyaheyoo dagaallo ka dhexeeyaan .

Wuxuuyidhi saxaabigii xadiiskan warinayey(Abaa saciid):waxaan markhaati ka ahay inaan sidaa ka maqlay Nabiga(csw), waxa kale ooaan markhaati ka ahayin Sayid cali(rc)uu la dagaalmay inigoo lasocda,markaa wuxuu amray in ladoono ninkiiRasuulku(csw) uusii sheegey calaamdihiisa,deedna waa lasoo daydayeymarkaasaa lookeeney(8), waxaana ku arkey calaamadiiuu Rasuulku(csw) ku tilmaamey(9).

waxaa weriyey xadiiskan Bukhaari iyo Muslim, iyo Tarmaddi …

Faah faahin:

(1)Waxay ahayd xilliga uu Nabigu(csw) qaybinayey deeqdaa iyada ah, markii laga soo hoydey dagaalkii (Xuneyn).

(2)Micnuhu waxa weeyi;kooxo ayaa soo bixidoonamarkaad aragtaan sidey u tukanayaan iyo salaad badnaantooda aadis

odhaneysaan idinku salaadihii aad tukaneyseen wax kheyr ah la'idinkama qorinama sida loo tukado maba taqaanaan,soonkooda markaad aragtaan sidey usoomayaanawaxaad is odhaneysaan wax soonoo la'idinka aqbaley maba jiraan,idinkana qur'aan akhris badan oo markaad aragtaan sida ay qur'aanka u akhriyayaanna aad is odhaneysaan, idunku qur'aanka si wanaagsan uma'akhridaan ama maba taqaanaanba, hadana dhuunta uma dhaafsiisna, macanaha weyku adeeganayaane maba ay rummaynin waxna kagama sugna, waxaasoo dhan ee camal iyo cibaado ahnawax ajar ah looga qori maayo lagana aqbali maayo, waa hal bacaad lagu lissey.

Islaamnimada waxay uga baxeen tusaale ahaan sidii leeb inta ugaadh lagu ridey oo ku dhacay ugaadhii hadan kasii dhexbaxay oo kale, markaasaahadii lasoo qaado leebkii oo la'eego birtiisii wax dhiiga ama dheecaana midnaba laga waayey, (3)hadana waxaa laga eegay xagii qammadka amaba afkiisii horeisna waxba waa laga waayey, (4)hadana waxaa laga eegay xagii birta iyo afka hore ee falaadhu iska galayeen iyana waxba waa laga waayey, (5) hadana waxaa laga eegay xaga dambe ee falaadhu ku leedahay baalasha yaryar bal in wax dhiig iyo dheecaana miduun laga helo, deedna innaba waa laga waayey wax raad ah oo ay ku reebtey ugaadhii laguridey uur kujirteedu, (6)awooddii iyo xawaarihii uu ku socdey leebku ama falaadhuaawadeed,ayuu wuxuu ka dheereeyey uur kujirtii ugaadha wixii kasoo raaci lahaa ee dhiig ama dheecaana iyo wax raad oo kale midnaba,Intaasoo dhan oo tilmaama waxaa looga jeedaa iney islaamnimada ka fogyihiin khawaarijtuoo aaney haba yaraatee innabaraadeynin diinta islaamku qalbigooda, Sidaa ayuu markaa Nabigu(csw) inoogu tilmaamey khawaarijta .

(7)Waxaa kale oo Nabigu(csw) uu tilmaamey nin kamida kooxdaas,oo midabkiisuna madaw yahay,labadiisa dhudhuna

ama suxulladiisa mid ahaanuu ku yaalo cad u'eg naaska dumarka ama waslad hiliba oo ruxmeysa.

(8)Markii uu ladagaalamey sayid cali (rc) khawaarijta waxa uu amrey in ninkan lagasoo dhexbaadhokhawaarijta, deedna waxaa lagasoo dhex helay maydkoodii, markaasaa loo keenay sayid cali (rc)isagoo bakhtiyey, (9) dabadeeto wuxuu saxaabigii xadiiska weriyeygoobjoog u haa ama xaadir ahaa hadalkiiNabigu (csw)uu kaga sii warbixiyey khawaarijta dhacdadiisii oo maqal iyo muuqaal ah,isagoo ka markhaati galeyinuu indhihiisa ku arkey tilmaamtii uu kasii bixiyey Rasuulku (csw) waxaaney Rasuulka (csw)mucjizadiisuu cadaatey maalinweyn qorax joogtasideeda oo kale …

5- عن زيد بن وهب الجهني وكان في الجيش الذي سار مع عليٍّ إلى الخوارج فقال عليّ: أيّها النّاس إنّي سمعت رسول الله ✕ يقول: يخرج قوم من أمّتي يقرأون القرآن ليس قراءَتكم إلى قراءتهم بشيء ولا صلاتكم إلى صلاتهم بشيء ولا صيامكم إلى صيامهم بشيء يقرأون القرآن يحسبون أنّه لهم وهو عليهم لاتجاوز صلاتهم تراقيَهميمرقون من الإسلام كما يمرق السّهم من الرّميّة ,لو يعلم الجيش الّذي يصيبونهم ما قضي لهم على لسان نبيّهم ✕ لاتّكلوا عن العمل(1)وآية ذالك أنّ فيهم رجلا له عضدٌ وليس له ذراع على رأس عضده مثل حلمة الثّدي عليه شعرات بيض (2) فتذهبون إلى معاوية وأهل الشّام وتتركون هؤلاء يخلفونكم في ذراريّكم وأموالكم, والله إنّي لأرجو أن يكونوا هؤلاء القوم فإنّهمقد سفكوا الدّم الحرام وأغاروا في سرح النّاس(3) فسيروا على اسم الله .

قال زيد بن وهب فسرنا فنزلنا منزلا حتّى مررنا على قنطرة , فلما التقينا وعلى الخوارج يومئذٍ عبد الله بن وهب الرّاسبِيُّ , فقال لهم: ألقوا الرّماح وسلوا سيوفكم من جفونها

(4) فإنّي أخافأن يناشدوكم كما ناشدوكم يوم حروراء فرجعوا , فوحّشوا برماحهم (5) وسلُّوا السّيوف وشجرهم النّاس برماحهم فقتل بعضهم على بعض(6) وما أصيبمن جيشنا إلا رجلان, فقال عليّ: التمسوا فيهم المخدج (7) فالتمسوه فلم يجدوه,فقام عليّ بنفسه حتّى أتى ناساً قد قتل بعضهم على بعض قال: أخّروهم فوجدوه ممّا يلي الأرض فكبّر عليّ ثمّ قال: صدق الله وبلغ رسوله ,فقام إليه عبيدة السّلمانيّ فقال:يا أمير المؤمنين آلله الّذى لا إله إلا هو لسمعت هذا الحديث من رسول الله ✕ ؟ فقال: إى والله الّذى لا إله إلا هو حتّى استحلفه ثلاثاً وهو يحلف له(8). رواه مسلم وأبو داود .

---

(1) لو يعلم الجيش الذى يقاتل هؤلاء ماله عند الله في الأخرة لترك العمل اكتفاء ذالك .(2) فعلامة هؤلاء الخوارج أن فيهم رجلا ليس له ذراع وله عضد على رأسه مثل حلمة الثدي عليه شعرات بيض. (3) أغاروا على مواشى الناس السائمة فنهبوها . (4) فقال لهم علي ألقو الرماح وأخرجوا السيوف من أغمادها فإنى أخاف أن يطلبوا منكم الصلح ويستحلفونكم بالله كما حصل في غزوة حروراء . (5) رموا بها عن بعد منهم . (6) داهموهم بالرماح ثم بالسيوف فأنزلوهم بالأرض صرعى وأبادوهم جميعا , فقادهم تدبيرهم إلى تد ميرهم .(7) أى ناقص الذراع الذى مر وصفه . (8) الله منصوب بنزع الخاض أى أسألك بالله هل سمعت رسول الله ✕قال: نعم والله _ ثلاث مرات _ ليؤكد ذالك للحاضرين ويظهر لهم تلك المعجزة الباهرة ...

Macnaha Xadiiska:

(4) Waxaa laga wariyay saxaabiga magiciisa layidhaa (Zeyd binu wahab)(rc) oo kamid ahaaciidankii lasocdey Sayid cali (rc) markii uu ladagaalmayey khawaarijta.Wuxuu yidhi Sayid cali (rc) isagoo u khudbadeynaya ciidanka:dadyehaw waxaan ka maqley Rasuulkii ilaahay(scw) isagoo leh; "waxaa kasoo dhexbixi doona ummadeydakooxQur'aanka akhriyeysa, oo marka loo eegosidey u akhriyayaan aaney qur'aanakhrintiinu waxba aheyn,salaadoodana marka loo eego sidey u tukanayaan aaney salaadiinu waxba aheyn,soonkiinana marka loo eegosoonkooda aanu soonkiinu waxba aheyn,Qur'aanka ayey akhriyayaan,waxaaney umalenayaan qur'aanku inuu wanaag ku tilmaamayo oo ay ajar ku helayaan,iyaga ayuunakawaramayaa munaafaqnimadooda iyo

cadaabka uu ilaahay ku abaalmarin doono,salaadooduna u dhaafimeyso karreysimaha(qulaanqusha),Islaamnimada ayey ka dhexbaxayaansida falaadhu waxa lagu ridomarka ay ku dhacdodegdeg uga dhexbaxdo oo kale,hadey ogaan lahaayeen nimankaa ciidanka ka hortagi doonaxigmaddaloogugudbiyey carabka Nabigooda (scw),way wahsan lahaayeen camal iyo cibaado oo dhan(1),

Waxaana calaamad u ah nimankaa, Nin baa ku jiraxubincadaleh oo aan dhudhunnlahayn, xubintaa cadka ah waxay u'egtahay naaska dumarka oo kale,dushana waxay ku leedahay timo yaryar oo cad(2).

Ma waxaydun u tagi mucaawiye iyo reer shaam (la dagaa-lameysaan), kuwaana(khawaarijta) weydun ka tageysaan, deedna ay idiin daba maraan guryihiinii iyo xoolihiinii, wallaahi anigu waxaan rajeynayaa inay kuwaasi yihiin kuwii (khawaarijta)Waxay daadiyeen kuwaasi dhiig xaaraan ah, oo waxay bililiqeysteenxoolihii dadka oo ay dhaceen (3),

kusocda (Bissinka ilaahay)(kuddagaal gala).

Wuxuu yidhi markaa saxaabigii xadiiskan wariyay(Zeyd binu wahab): waanu ku dhaqaaqney deedna waxaanu kusoo dagney meel, ilaa aanu soo marney kaabad dusheeda ama (biriish), markii aanu lakulanney (khawaarijta),

khawaarijtana maalintaa waxaa hogaaminayey(c/laahi binu wahab Arraasiyu)markaasuuyidhi:ku tuura warmaha seefahana galka kalabaxa(4),waxaan idiin ka baqayaainay idin la heshiiyaan sidii maalintii(xaruuraa'a)oo kale,deedna ay iska noqdaan. Markaasey ku ganeen warmihii(5),Seefihiina galka kalabexeen,dadkiina waxey kula boobeen warmahoodii,badhba badhkii kale ayuu markaa la dagaalamey(6), anagana maalintaalabanin mooyee wax kale kama dhimanin ciidankayagii, dabadeetoSayid cali (rc) ayaa wuxuu yidhi: halagasoo

dhexbaadho ninkii bilaa dhudhunka ahaa(7), waa la soo deydayey deedna waa laga waayey,

markaasuu isagu ukacay inuu soo xaqiijiyo ninkaa isaga ah,ilaa uu dulyimid dad uu tuulanyahay maydkoodu oo badhba badhkii kale laayey, dabadeeto wuxuu yidhi; kala gura meydkooda, xagii dhulka uxigtey ayaa deedna laga helay, markaasuu yidhi Sayid cali (rc); (Ilaahaybaawayn)hadan wuxuuyidhi: Ilaahay waa uu kadhdhabeeyeywixii uu sheegey,Rasuulkiisuna waa uu gaadhsiiyey.

Dabadeeto waxaa kacay saxaabiga layidhaahdo (Cubeydatu Assalmaaniyu) markaasuu ku yidhi: Amiirkii mu'u miniintowIlaahay baan kugu dhaariyey Allihii isaga mooyee Ilaah kale aanu jirine, makaa runbaa inaadka maqashaywarkaaRasuulkii Ilaahay (csw)?.

Markaasuu yidhi: haa WallaahiAllihii isaga mooyee Ilaah kale aanu jirinayaan ku dhaarte, ilaa uu sadex goor ugu dhaartey(8)…

Faah faahin:

(1)micnuhu waxa weeyaan,hadey ogyihiin ciidanka la dagaalamidoona nimankaa khawaarijta ah,ajarkaay ka helayaanee (Janno iyo Darajo)Ilaahay agtiisa uyaallaaakhiro,waxay deyn lahaayeen amabawahsan lahaayeen camal iyo cibaado kale oo dhan, iyaga layntooda ayuunbey ku kaaftoomi lahaayeen.

(2)macnahatilmaamta nimankaa waxaa lagu garanayaa, Nin baa ku jira aan dhudhunn lahayn, waxaana meeshii dhudhunka ku yaala xubin hiliba ama cad ah oo aad dusha moodeysednaas, korkana waxay ku leedahay timo yaryar oo cad .

(3)Waxa looga jeedaa,nimankani (khawaarijtu) waxa ay laayeenisla wakhtiyadaadad islaam ah,markaasayboobeen hantidoodii, xoolohoodiina ay qafaasheen .
(4)Sayid cali (rc)markaa yidhi: ku tuura ama ku weerara warmihiina, seefahana kasaara galka,
(5)Macnahawaxaan idiin ka baqayaa inay idinkacodsadaan heshiis, oo si aad u aamintaan ay idiin dhaartaan, sidii dhacdey dagaalkii (xaruuraa'a) oo kale .
(6)Marakaasayweerareenoo warmihii ku ganeen, kadibna seefihii ayeyulabaxeen oo ku laayeen,deednadhulka ayey dhigeen oo maydkooda lawadhey,waaney ku le'deen dhamaantood,waxay soo gunaandeen ama soo gaba gabeeyeen markay hubiyeen inay jabiyeen .
(7)Wuxuu u jeedey Sayid cali (rc) markaa ninkii bilaa dhudhunka ahaaee uu tilamaamey Nabigu (csw) in lagasoo dhex raadiyobakhtigooda.
(8)Micnahawuxuu ku dhaariyey saxaabigaasi,in uu ka maqley Rasuulka (csw) warkan,dabadeeto Sayid cali(rc) intuu yidhi;haa,ayuu weliba seddex goor oo is xigaugu dhaarteysi ay intoodii kale ee goobjooga ahaydna u xaqiiqsadaan,wuxuuna u cadeeyey ama u iftiimiyey in taasi ay tahay mucjizo cadoon daahna saarneyn.

…Dhammaad …

Gunaanad:

Hadaba walaal kayga muslimka ahaw,kadib markaad soo akhrisatey,Aayado Qu'aanah iyo Xadiisbawixii aan kaaga soo minguuriney(rarney)intii awooda ah, kutubta waaweyn ee islaamka,ee ay qoreen imaamyadii ku caan baxayXadiiska ama warkaRasuulka (scw)sida (ImaamuBukhri iyo Imaamu Muslim),

Markii aad fahamteymacnahooda wixii ay inooga sii digeen Ilaahay iyo Rasuulkiisba(csw)waxaad ogaatey Khawaarijtu waxa ay yihiin magac kastaba ha labexeene, halkan iyo halkaa meelkastaba hajoogeene,waxaana markhaati madoon ah inay ku cadyihiin sifooyinkaa iyo tilmaamahaauu Rasuulku (csw) inooga

waramey, kuwa maanta jooga ee waxkalebadaayoo,Xabaalihii islaamkasoo fagaya(Qodaya)ee ku gawracaya dadka islaamka ahmindidii xoolahaba laga qarinjireymarka la qalayo,xubnahoodana iibsanaya,ee lugaha iyo gacmahaba is weydaarka u jaraya,eeisku qarxinaya bulshada islaamka ah dhexdooda, sababtuna ay tahay iney gaalo yihiin, waxaas oo dhannau markhaati gashanayaQur'aan ka ilaahay ee ay marwalba iyagu sidey doonaanrayigoodaugu fasiraan,iyadoo welibauu inoo sheegey Rasuulku(csw) iney soo bixi doonaan xilli ama wakhtiuu dadku is khilaafsanyahaymaamul shaqeynayaanaaanu jirin.

Waxa kale oo aynu aragnaasidaynu kor kusoo xusney ee uu Ilaahay (sw)Qur'aankiisa inoogu sheegay ama Rasuulku (csw) inooga sii waramey, kuwo iyaguna intaa dhissaya masjidkii dhibaatadaiyo madarasado oo Qur'aanka akhriyaya kalxamahanaaanu u dhaafaynin, oo salaada qab'taa ku hahaya marwalba, dadkana ugu yeedhaya diintaoo suuqa iyo masaajidadoodaba la taagan,sidii ay kaligood iyagu haystaan diinta ama yaqaanaan, oo dadkii hore ee culimada ahaa iyo kuwii danbeba ay jaahiliin ahaayeensida ay goor kasta ku hadaaqaan iyagu,

oo marba odey beeleedhorleh soo fangareynaya(abaabulaya)si ay dadka islaamka ah ee walaalaha ah isugu dhuftaan (Dagaal sokeeye),

Caruurtamadarasadahooda lageeyonaseddex tawxiid oon iyaga hortood lamaqlin usoo dhigaya,kana soo dhaadhicinaya in waalidkoodu xaaraan isku qabaan ooaaney diin heysan,dadkoo dhanna gaalo yihiin, hadey isku qarxiyaannaay janada galayaan .

Haddaba akhriste intaasoo dhan iyo in kabadanba weynu aragney (aragnaa)hadana hoos uma dhuganno (uma eegno)kamana dhawrsannoee culimo ayeynuweliba u naqaanaa.

Hadal iyo dhamaan dadyahaw muslimka ah,Ilaahay (sw) Diin kale oo taad ku dhalateenee aad ku abtirsateen midaan ahaynmuusoo dajinin,Rasuul ka danbeeyey Nabigeenii Muxammad ahaana (csw)ma jiro ee walaalayaal yaan la'idin khaldincaruurtiinana la'idinka baadiyeynin, hoosna u eega waxa loosoo dhigayo…

وفي الأخير:

أخى المسلم: فإليك الأن, بعدما فهمت من أنّ النّصيحة واجب على كلّ مسلم, وقرأت فيماسبق إلينا من القرآن والحديث: فهل لك شيء تبذله على أن تأخد نصيحتى في آخرتك ودنياك؟ وتحذيرى إليك لمن يفتنك أنت ووالدك وزوجتك وعيالك وقرابتك والناس أجمعين؟ من جانب دينك وإعتقادك مع حسن إيمانك؟

وإنى أرجو أن أهديك إلى الصواب بقدر ما استطعت إن شا ء الله . وفقني الله وإياك على الصواب.

Ugu danbeyntii:

Walaalkeyga muslimka ahaw, hadaba imaka adigu, kadib markaad fahamtey iney naseexadu qofkasta oo muslima waajib ku tahay, oo aad soo akhridey Qur'aan iyo Xadiis intii aynu kasoo xusney,magaraneysaa wax kale oo aad ku badalatid,inaad qaadato naseexadeyda ama waanadeydaku saabsan aakhiradaada iyo aduun yadaadaba? Iyo digniin teydaaan kaaga digayo mid kaa fitneynaya, Adiga iyo waalidkaaga iyo xaas kaaga iyo ciyaal kaaga iyo dadkoo dhanba, xaga diintaadaiyo caqiidadaadaxataaiimaankaga wanaagsan?Anigoo rajeynaya inaan kugu hago tubata toosan intii karaankeyga ah hadii ilaahay yidhaa .

...اللّهم هل بلغت ...

Allaha inawaafajiyo labadeenaba dariiqa toosan …aamiin

- ***Waxaa qoray*** buug Sh, Muxammad Shaafi Sh yuusuf Sh, maame,